# Boodhka Xuquuqda Caafimaadka Dadweynaha ee Goobta Shaqada ee Colorado: FASAXA MUSHAHARKA LEH, SIR SHAACINTA, & QALABKA ILAALINTA

COLORADO Department of Labor and Employment

*La cusbooneysiiyay Luulyo 14-keeda, 2023*

*waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiiyo si xilliyo ahaan ah*

## XEERKA QOYSASKA & GOOBAHA SHAQADA EE CAAFIMAADKA QABA ("HFWA"): Xuquuqaha ku aadan Fasaxa Mushaharka leh

**Ceymiska: Dhamaan loo-shaqeeyayaasha Colorado, oo cabbir kastaa leh, waa iney bixiyaan fasax mushahar leh**

- Dhammaan shaqaaluhu waxay helaan 1 saac oo fasax mushahar ah 30-kii saacadood ee ay shaqeeyeen ("fasaxa la isku soo aruuriyey"), ilaa 48 saacadood sannadkii.
- Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay in la siiyo mushaarkooda caadiga ah inta lagu jiro fasaxa, shaqabixiyuhuna waa inuu sii wadaa siinta dheefahooda.
- Ilaa 48 saacadood oo fasax urursan oo aan la isticmaalin ayaa socon doona si loogu isticmaalo sanadka soo socda.
- Faahfaahinta xaaladaha gaarka ah (saacadaha aan caadiga ahayn, mushaharka aan saacadaha ahayn, iwm.), eeg Xeerka Ilaalinta Mushaharka 3.5, 7 CCR 1103-7.
- Ilaa 80 saacadood oo fasax dheeri ah ayaa lagu dabaqaa xaalad caafimaad oo degdeg ah oo dadweyne (PHE), illaa 4 toddobaad kadib marka PHE-ga uu dhammaado.*

**Shaqaaluhu waxay u isticmaali karaan fasaxa la isku soo ururiyey baahiyaha soo socda ee ku aadan badbaadada ama caafimaadka:**

(1) jirro maskaxeed ama jireed, dhaawac, ama xaalad caafimaad oo is hor istaageysa shaqada, oo ay ku jiraan cudur ogaanshaha ama daryeelka ka hortagga;

(2) xadgudubka guriga, xadgudubka galmada, ama dhibaataynta dembiyeed ee horseedaysa baahiyaha adeegeed ee caafimaad, meel kale u guuritaan, sharciyeed, ama kuwo kaleba;

(3) daryeelida xubin qoyska ka mid ah oo la kulmaya xaalad lagu sifeeyay qaybta (1) ama (2);

(4) murugada, ka qeybgalida aaska/xusuusashada, ama baahida dhaqaale/sharciyeed ka dib geeri ku imaada xubin qoyska ka tirsan;

(5) sabab cimilada oo xumaada awgood ah, go'itaanka korontada/kuleeliyaha/biyaha, ama dhacdo kale oo lama filaan ah awgeed, shaqaaluhu waxay u baahan yihiin inay midkood (a) ka guuraan hoygooda, ama (b) daryeelaan xubin qoyska ka mid ah oo dugsigiisa ama goobtiisa daryeelida la xidhay; *ama*

(6) marka ay jirtoay PHE, sarkaal dawladeed ayaa xidhay goobta shaqada, ama dugsiga ama goobta daryeelka ilmaha shaqaalaha.

**Siyaasadaha Loo-shaqeeyaha (Ogaysiiska; Dukumeentiyeeynta; Isticmaalka Kordhinta, Qarsoonaanta, iyo Diiwaanada Fasaxa Mushaharka leh)**

- **Ogeeysiika qoran iyo boodhadhka.** Loo-shaqeeyayaashu waa inay (1) siiyaan ogeysiis shaqaalaha cusub wakhti aan ka dambaynin dukumeentiyada/siyaasadaha kale ee shaqo kala barida; iyo (2) soo bandhigaan boodhadhka la cusboonaysiiyay, oo ayna siiyaan ogeysiisyada la cusboonaysiiyay shaqaalaha hadda, dhammaadka sanadka.
- **Ogeysiiska ku aadan fasaxa "la sii arki karo".** Loo-shaqeeyayaashu waxay ku qaadan karaan "habraacyo macquul ah" hab qoraal ah sida shaqaaluhu ay tahay inay u bixiyaan ogeysiis haddii ay u baahan yihiin fasax "lasii arki karo", laakiin **ma diidi karaan fasaxa mushaharka ah** taasoo ku aadan u hoggaansanaan la'aanta siyaasadda noocaas oo kale ah.
- **Loo-shaqeeyaha ayaa u baahan kara dukumeenti si uu u muujiyo in fasaxa isku soo ururay uu ahaa sabab u qalmida kaliya haddii fasaxa uu ahaado afar maalmood ama ka badan oo maalmo shaqo ah oo xiriir ah** (tusaale ahaan maalmo uu shaqaaluhu shaqayn lahaa, ma'aha maalmo taariikh jadwaleed).
- **Dukumentiga looma baahna si *loo qaato* fasaxa isku soo ururay,** laakiin waxa loo baahan karaa isla marka uu shaqaaluhu ku soo noqdo shaqada ama uu ka tago shaqada (hadba mid dhakhso hordhacaa). **Wax dukumeenti ah loogama baahna fasaxa PHE-ga.**
- **Si loo diiwaangeliyo fasaxa baahiyeed ee shaqaalaha (ama xubnaha qoyska shaqaalaha) ee la xiriira caafimaadka**, shaqaaluhu wuxuu bixin karaa: **(1)** dukumeenti ka yimid bixiyaha adeegga caafimaadka ama bulshada *haddii* adeegyada la helay oona dukumeenti lagu heli karo waqti macquul ah iyo iyadoona kharash dheeraad ah aysan jirin; ***haddii kale* (2)** qoraalka isla shaqaalaha.
- **Dukumeentiga ku saabsan xadgudubka guriga, xadgudubka galmada, ama dhibaataynta dembigu** waxay noqon kartaa dukumeenti ama qoraal hoos imaada (1) ee sare (*tusaale bixiyaha* adeegyada meel habeynta ama hoyeynta) ama (2) ee kore, ama dukumeenti sharci ah (amarka xakameeneyd, warbixinta booliiska, iwm.).
- **Haddii loo-shaqeeyuhu uu si macquul ah u arko inuu liito dukumentiga shaqaalaha**, loo shaqeeyahu waa inuu: (A) ku wargeliyaa shaqaalaha todobo maalmood gudahooda marka la helo dukumentiga ama ku soo laabashada shaqaalaha ama kala tagga (hadba kii soo hormaraa) iyo (B) siiyaa shaqaalaha ugu yaraan todobo maalmood si uu u daweeyo liidashada.
- **Isticmaalka Kordhinta.** Iyadoo ku xiran siyaasadda loo-shaqeeyaha, shaqaaluhu waxay ku isticmaali karaan fasaxa saacadooda ama lixdooda-daqiiqo si kordhin ah.
- **Qarsoodinimada Shaqaalaha.** Loo-shaqeeyayaashu kama dalban karaan shaqaalaha inay shaaciyaan "faahfaahinta" macluumaadka shaqaalaha (ama qoyskooda) ee ku saabsan caafimaadka ama badbaadada ee la xiriira HFWA; macluumaadka noocaas ah waa in loola dhaqmaa sidii diiwaan caafimaad oo qarsoodi ah.
- **Diiwaanada waa in la hayaa oo la bixiyaa marka la codsado.** Loo-shaqeeyayaashu waa inay bixiyaan dukumeenti ku saabsan qadarka hadda ee fasaxa mushaharka ah ee shaqaaluhu haystaan (1) diyaar u ah isticmaalka, iyo (2) horay loo isticmaalay inta lagu jiro sanadka dheefta ee hadda, oo ay ku jiraan fasax kasta oo PHE oo kab ah. Macluumaadka waxaa la codsan karaa bishii hal mar ama marka baahida fasaxa HFWA ay soo baxdo.

**Aargoosiga ama Faragelinta Xuquuqda HFWA**

- **Fasaxa mushaharka leh looma xisaabin karo si "maqnaansho" ah** taasoo keeni karta in la eryo ama fal kale oo xun.
- **Shaqaale loogama baahna inuu soo helo "shaqaale beddel" ama caynsanaanta shaqada marka uu qaadanayo fasaxa mushaharka leh.**
- **Loo-shaqeeyaha ma eryi karo, handadi karo, ama si kale ugama aargoosan karo, ama ma faragelin karo isticmaalka fasaxa**, shaqaale kaasoo: (1) codsada ama qaataa fasaxa HFWA; (2) ku wargeliyaa ama ka caawiya qof kale gudashada xuquuqda HFWA; (3) xareysta cabasho HFWA; ama (4) la kaashi la sameeyaa/caawiyaa baaritaanka xadgudubka ee HFWA.
- **Haddii macqul ahaanta shaqaalaha, iimaan-wanaagsanida cabashada HFWa-ga, codsiga, ama hawlaha kale ee *ay khaldan yihiin***, loo-shaqeeyaha uma baahna inuu ogolaado ama uu u fasaxo, laakiin kuma sameyn karo *fal lid ku ah* shaqaalaha sabab taas la xidhiidha. Shaqaaluhu *waxay* la kulmi karaan cawaaqib ku aadan si xun u isticmaalka fasaxa.

## MUUJINTA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD/BADBAADEED EE LA ILAALIYAY & SIR SHAACINTA ("PHEW"): Xuquuqda Shaqaaluhu inay Muujiyaan Walaacyada Caafimaadka/Badbaadada ee Goobta Shaqada & Isticmaalka Qalabka Ilaalinta

**Ceymiska: Dhammaan Loo-shaqeeyayaasha iyo Shaqaalaha, Oo Lagu daray Qandaraaslayaal Madax-bannaan Qaarkood**

- PHEW ma daboosho oo kaliya "loo shaqeeyayaasha" iyo "shaqaalaha," laakiin dhammaan "**maamulayaasha**" (loo shaqeeyaha **ama** ganacsi leh ugu yaraan 5 qandaraasleyaal madax-bannaan) iyo "**shaqaalayaal**" (shaqaale **ama** qandaraasleyaasha madaxa-bannaan ee u shaqeeya "maamule").

**Xuquuqda Shaqaalaha ee ku aadan Ka hor imaanshaha Xadgudubyada Caafimaadka/ Badbaadada ee Goobta Shaqada:**

- Waa sharci darro **in laga aargoosto, ama la farageliyo**, falalkan soo socda:
  (1) **u soo bandhigida walaacyo macquul ah**, oo ay ku jiraan si aan rasmi ahayn, maamulaha, shaqaalaha kale, dawladda, ama dadweynaha, kuwaas oo ku saabsan ku xadgudubka goobta shaqada ee ka dhanka ah xeerarka caafimaadka ama badbaadada ee dawladda, ama khatar caafimaad ama badbaado oo ka jirta goobta shaqada oo weyn;
  (2) **ka-hor imaanshaha *ama* marag-furida, caawinta, ama ka-qaybgalka** baadhista ama dacwadda ku saabsan aargoosiga, ama faragelinta, habraaca kor ku qoran.
- Maamuluhu uma baahna inuu wax ka qabto walaaca la xidhiidha PHEW ee shaqaalaha, laakiin wali ma eryi karo ama ma qaadi karo *tallaabo kale oo ka dhan ah* shaqaalaha taasoo ku aadan banaan u soo bandhigista walaac noocaas ah, ilaa iyo inta walaacu yahay mid macquul ah oo daacadnimo ku jirto.

**Xuquuqda Shaqaalaha si ay u Isticmaalaan Qalabka Ilaalinta Shakhsi ahaaneed ("PPE"):**

- Shaqaalaha waa in loo oggolaadaa **in si iskood ah ay u xidhaan PPE-kooda** (maaskaro, afsaab, galoofyada, iwm.) haddii PPE (1) uu bixiyo **ilaalin ka badan** qalabka lagu bixiyo goobta shaqada, (2) ay **ku talisay** hay'adda caafimaadka dawladda (federaal, gobolka, ama maxalli ah), iyo (3) uusan ka dhigaynin shaqaalaha **inuu awoodi waayo inuu qabto shaqada**.

## XUQUUQDA CABASHADA (hoos imaada HFWA iyo PHEW labadaba)

- U soo sheeg xadgudubyada Qaybta si cabasho ahaan ama tilmaamo qarsoodi ahaan ah, ama dacwad ka xarayso maxkamadda ka dib markii aad isticmaasho wixii dadaalo ah ka hor dacwadda.

Boodhkani waxa uu soo koobayaa laba sharci oo ah caafimaadka bulshada ee goobta shaqada ee Colorado: C.R.S. § 8-13.3-401 et seq., (fasaxa mushaharka leh), iyo C.R.S. § 8-14.4-101 et seq. (sir shaacinta ku aadan caafimaadka iyo badbaadada) oo ay ku jiraan wax ka beddelka hadda jira laga bilaabo taariikhda ku xusan boodhkan. Ma daboosho sharciyada kale ee caafimaadka ama badbaadada, qawaaniinta, iyo amarada, oo ay ku jiraan sida hoos timaada Xeerka Badbaadada Shaqada iyo Caafimaadka ee federaalka (Occupational Safety and Health Act, OSHA), ee ka socota Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo Deegaanka ee Colorado (CDPHE), ama wakaaladaha caafimaadka dadweynaha ee degaanka. Kala xidhiidh hay'adahaas macluumaadka noocaas ee ku saabsan caafimaadka iyo badbaadada.

*Marka ay tahay **PHE**, Shaqaaluhu waxay helaan saacado dheeraad ah oo fasax ah oo ay ugu wacan tahay karti la'aanta ku aadan iney shaqeeyaan, tijaabinta, karantiilida, daryeelida qoyska markii ay xaaladahaas oo kale jiraan, iyo baahiyaha la xiriira. Ma jiro wax PHE ah oo hadda shaqaynaya; doodhkan waa la cusboonaysiin doonaa haddii mid lagu dhawaaqo.

**Boodhkan waa in lagu dhejiyaa meelaha ay si fudud uga heli karaan shaqaalaha, lala wadaaga shaqaalaha meelaha fogfog ka shaqeeya, lagu bixiyaa luqaddo kale siddii loogu baahdo, oo lagu beddelo nooc kasta oo sannad kasta la cusboonaysiiyo.**

**Boodhkani waa mid soo koobid ah oo laguma kalsoonaan karo sida macluumaadka sharciga shaqada oo dhamaystiran. Dhammaan xeerarka, xaashiyaha xaqiiqda, tarjumaadaha, su'aalaha, ama cabashooyinka, la xiriir:**

**QEYBTA HEERARKA SHAQADA & ISTAATISTIKADA, ColoradoLaborLaw.gov, cdle_labor_standards@state.co.us, 303-318-8441 / 888-390-7936.**